Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay https://go.usa.gov/xtBQC.

Luulyo 6, 2022

Ku socota: Hay'adaha Maamullka Kiiska (CME-yada) iyo daryeel bixiyayaasha loogu talagalay guryaha koox ahaanta loo degan yahay, shaqada iyo taageerada hawlaha maalintii
Ujeedada: Ku darista dheeraadka ah oo dhan 5% ee ah korodhka heerka lacageed ee COVID-19 oo loogu talagalay waxyaabaha la iska reebay iyo waxyaabaha dheeraadka ah 'add-ons'
Ka socota: Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Farriintii Juun 23, 2022, ODDS waxay ku dhawaaqday in ay sii wadi doonto korodhka ah 5% ee COVID-19 ee Luulyo 1, 2022, muddo 90 maalmood oo dheeraad ah.

Hay'adaha daryeelka bixiyaa ma arki doonaan ama ma heli doonaan 5% ee ah korodhka heerka lacageed ee COVID-19 ilaa laga gaarayo dabayaaqada Luulyo taasi oo loogu talagalay waxyaabaha la iska reebay ama waxyaabaha dheeraadka ah 'add-ons' ee soo socda:

- Guriga koox ahaanta loo degan yahay ee dadka waaweyn
- Shaqada
- Taageerada hawlaha maalintii (DSA)

Dabayaaqada bishan, ODDS waxay iyada ka soo bilaabaysa taariikh hore 'retroactively' adeegsan doontaa korodhka heerka lacageed ilaa Luulyo 1, 2022, waxaana la kordhiyay ilaa Sibtambar taasi oo loogu talagalay waxyaabaha la iska reebay ee la ansixiyay. ODDS waxay la xiriiri doontaa daryeel bixiyayaasha taageera qof haysta waxyaabo la iska reebay oo la

ansixiyay ama waxyaabo dheeraad ah ‘add-on’ marka korodhka heerka lacageed ee ka soo bilaabmaya taariikh hore ‘retroactive’ la dhammeystiro.

Fadlan ogow: Wakhtigan la joogo, qoraalka maalgelinta ee tilmaamaya waxa ka reeban qofka ama waxyaabo dheeraad ah ‘add-on’ kuma jiraan korodhka heerka lacageed ee COVID-19. Marka la dhammeystiro korodhka heerka lacageed ee ka soo bilaabmaya taariikh hore ‘retroactive’ iyo wada xiriirka, dhammaan waxyaabaha la iska reebay ee la ansixiyay ama qoraalada maalgelinta ee dheeraadka ah ‘add-on’ waxaa ku jiri doona korodhka heerka lacageed ee COVID-19.

Carruurta ku nool guri koox ahaan loo degan yahay ee haysta waxyaabo la iska reebay oo la ansixiyay ama waxyaabo dheeraad ah ‘add-on’ waxay sii wadan doonaan in ay helaan heerka lacageed ee COVID-19 ee la iska reebay ama waxyaabaha dheeraadka ah ‘add-on’ ilaa Sibtambar 2022. Korodhka heerka lacageed waxaa isla hadaba la geliyay heerarka lacageed ee la iska reebay iyo waxyaabaha dheeraadka ah ‘add-on’.

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la’-indhaha la’, maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.